



## McKean: Mustaqbalka PPS waa mid wanaagsan

Inkasta oo “uu ahaa sanad adag oo wakhti kala guur ah lagu jiray” Dugsiga Dadweynaha Portland waxay sameeyaan horumar la taaban karo, Kormeeraha Guud ee Ku meel gaarka ah Bob McKean ayaa xubnaha ka tirsan guddiga ugu sheegay kulankiisii kama dambaysta ahaa ka hor inta aanu qandaraaskiisa shaqo dhammaan dabayaqaqada bishan.

“Waxaan muddo aad u gaaban ku gaarnay horumar,” ayuu sheegay McKean. “Waxaan aaminsanahay in mustaqbalka PPS uu noqonayo mid wanaagsan.”

McKean wuxuu la wareegay shaqada kormeeraha guud ee ku meel gaarka ah Sibtambartii la soo dhaafay ka dib markii ay is casishay Kormeeraha Guud ee Carol Smith. Wuxuu soo noqday kormeeraha guud ee Dugsiga Degmada Centennial ka hor inta uusan hawlgabka noqon. 10 bilood ee uu ahaa kormeeraha guud ee ku meel gaarka ah, PPS waxay qaaday tallaabooyin kala duwan oo ay ka mid yihiin:

Dugsiyo cusub oo la jaanqaadaya Qarniga 21 – Maalgelintii daymeed ee ay oggolaadeen cod bixiyayaashu 2012-kii waxaa lagu bixiyay casriyeynta Dugsiyada Sare ee Franklin, Roosevelt iyo Faubion PK-8, iyada oo dhismuhu xagaagan ka bilaabmayo Grant. Maalgelinta daymeed ee ay oggolaadeen cod bixiyayaashu sanadkan waxaa dib loogu dhisi doonaa dugsiyada sare ee Lincoln, Madison iyo Benson iyo Dugsiga Dhexe ee Kellogg, iyada oo uu dabooli doono mashaariicda caafimaadka iyo badbaadada ee guud ahaan degmada. Marka la isku geeyo, cod bixiyayaashu waxay oggolaadeen in ka badan \$1 billion oo ah maalgelinta daymeed ee loogu talagalay PPS shantii sano ee la soo dhaafay.

Dib u habeynta iyo wax ku oolnimada – Inkasta oo dhaqaale aan ku filnay laga helay gobolka, taasi oo keentay in \$18 malyuun laga jaro miisaaniyadda PPS, Qorshaha cusub ee kharashka ee degmadu wuxuu tilmaamayaa in lacagta shaqaalaha laga soo qaado Xafiiska Dhexe ee maamulka loona diro dugsiyada iyada oo ay qayb weyn ka tahay dib u habeynta iyo wax ku oolnimada degmada.

Dugsiyada dhexe oo la hagaajiyo – Qorshe ayaa socda laba dugsi dhexe oo cusub lagaga furayo Harriet Tubman iyo Roseway Heights marka la gaaro sanad dugsiyeedka 2018-19. Dugsiyadani waxay furmi doonaan iyaga oo leh heer waxbarashada dhexe oo cusub oo ay degmadu dejiyay.

“Waxaa jira awood iyo isdhhexgal marka la wada shaqaynayo,” ayuu McKean u sheegay guddiga, isaga oo aqoonsaday dadaalada koox ahaaneed ee guulaha ay degmadu gaartay.

Guddoomiyaha guddiga ee xilka ka tagaya Tom Koehler ayaa ku ammaanay McKean in uu dib uga soo noqdo hawlgabnimada si uu xirfadiisa ugu keeno PPS.

“Wuu yimiday wuxuuna keenay xasilooni, wuxuu taageeray shaqaalaha isla markaana kala shaqeeyay guddiga in ay dib habeeyaan meelaha muhiimka ah ee xafiiska dhexe,” ayuu sheegay Koehler. “Laakiin ta ugu muhiimsan, Bob wuxuu na siiyey hoggaamin weyn wakhti ay muhiim ahayd. Wuxaan weligayo ugu mahadnaqi doonaa tallaabada loo baahnaa ee uu qaaday.”

McKean wuxuu xusay dhowr goobood oo PPS ay kaga faa'iido badan tahay degmooyinka kale ee magaaloooyinka waaweyn ku yaala: "iyada oo ah meel wanaagsan oo" arday kala duwan leh, magaalo tiro badan oo arday ahi dhigtaan dugsiyada dadweynaha, oo leh waalidiin heegan ah, iyo macallimiin fiican iyo shaqaalaha wax taageera.

McKean wuxuu sidoo kale talooyinka qaarkood u hayay guddiga, oo ay ka mid noqon doonaan saddex ka mid ah xubnaha cusub ee guddiga la doortay laga bilaabo Luulyo 1. Wuxuu ku dhiirigelitay xubnaha in ay u shaqeeyaan "guddiga ahaan iyaga oo wada dhan," ee aanay noqon shakhsiyad qorshayaal gaar ah leh. Wuxuu sidoo kale soo jeediyay in ay diirada saaraan abuurida xaaladdo taageero ka geysan doona "soo jiidashada iyo haysashada hoggaamiyaasha hibada leh."

"Wanaaga si fudud laguma mutaysan karo," ayuu sheegay McKean. "Laakiin waa mid la gaari karo. Aniga oo aan ka fikiri karin in aanay jirin degmo meelaha magaalada ah ku taala oo ku haboon in ay guul gaarto oo aan ka ahayn PPS."